

Head Injury (Somali)

Daryeelka dhaawaca madaxa marka uu qofku ka baxo qeybta gurmada degdega ah (emergency)



Ilmahaaga waxaa la geeyay Waaxda Gargaarka Degdega ah (Emergency Department) ka dib markii uu madaxa ka dhaawacmay waxaana la go'aamiyay inay safe tahay inuu guriga aado. Inta badan carruurta uu soo gaaro dhaawac fudud oo madaxa ah ayaa si dhakhso ah u bogsada laakiin waxaa muhiim ah in aad si taxadar leh ula socotid ilmahaaga toddobaadka xiga si aad u ogaatid inay yeeshaan astaamo/calaamado kasii daraya oo dhaawac madaxa ah iyo in kale.

Daryeelka guriga

48-da saacadood ee ugu horreeysa dhaawaca madaxa ka dib, ku dhiiri geli ilmahaaga inuu:

- nasto (laakin waxbana haka badalin xilliyada ay seexdaan/ama ay soo toosaan)
- cun cunto caafimaad leh oo cab cabitaanno badan
- ka fogoow meelaha qaylada dheer iyo eegista shaashadaha/alaabta dhijitaalka ah
- iska ilaali inaad sameysid waxyaabaha uga sii daraya dhaawaca.

Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

U kaxee ilmahaaga qaybta gargaarka degdega ah (emergency department) ee kuugu dhow haddii:



uu leeyahay madax-xanuun zaaid ah, gaar ahaan haddii uu ka sii darayo markii daawo xanuun jabiye ah la qaato



hadalkooda uu go'goayo (uu hadalka ku yahay)



ay wareerayaan iyo/ama aysan si caadi ah u socon karin.



haddii ay aragtidooda shucaac gasho/ ama aragtidoodu labanlaabanto



haddii ay dareemayaan lallabbo (sida inuu matag hayo oo kale) ama ay si isdaba joog ah u matagayaan



haddii ay qabaan suuxdin (qalal ama uu jiro jarreys aan la xakamayn karin)



haddii ay qabaneysa hurdo lama filaan ah ama ay dareemayaan daciifnimo



haddii ay leeyihiin ooyin joogto ah oo aysan si sahlan ku aamuseen (carruurto) way xanaaqaan (xanaaq ama caro)





haddii ay jah-wareer dareemayaan ama sidii inaysan wax kala ogeen (ma garanayaan halka ay joogaan)



haddii uusan abateedkoodu fiicnayn (carruurta).

Haddii xaalad qatar ah oo degdeg ah la galo, had iyo jeer wax lambarka Seddexda Ebar (000) isla markiiba.

Miyir beel ama jah-wareer muddo gaaban ah (concussion)

Carruurta qaarkood waxay dareemaan miyir-beel (taas oo ay sabab u tahay isbedel muddo kooban ah oo ku yimaada qaabka ay maskaxda u shaqeyso) markuu dhaawac fudud madaxa ka gaaro.

Haddii ilmahaagu qabo miyir beel, waxaa laga yaabaa inay yeeshaan qaar ka mid ah calaamadahan inta lagu jiro qadarka soo kabashada:

- madax-xanuun fudud oo nasasho iyo dawada xanuunka marka la qaato kabacdi taga
- dawakhsanaan fudud
- inay dareemayaan daal
- inay ku adkaato xasuusta ama inay wax kasta fiiro gaar u yeeshaan
- shucuurtoodu inay kacsan tahay ama dareen qalafsan.

Calaamadahani waxay caadi ahaan meesha uga baxaan muddo ka dib. U tag GP-gaaga haddii aad ka walaacsan tahay xaaladooda.

Ku noqoshada iskuulka

Ku wargeli skuulka ilmahaaga ama xannaanada carruurta dhaawaca madaxa ee soo gaaray. Si tartiib-tartiib ah in loogu soo laabto iskuulka ama xannaanada carruurta waxay ka caawin kartaa ilmahaaga inuu daal kasta oo maskaxda iyo jirka ah la qabsado. Carruurta qaarkood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan in marxaladooda si gaar ah loo tixgeliyo gaar ah haddii ay jiraan imtixaano ay galayaan maalmo dhow dhaawaca madaxa kabacdi.

Ku soo laabashada ciyaaraha

Ilmahaagu waxa uu bilaabi karaa jimicsiga markay dhawr maalmood nastaan si loo siiyo waqti ay xaaladoodu ku degto. Ilmahaaga waa inuu si tartiib-tartiib ah ugu soo noqdaa ciyaaraha isagoo marka hore bilaabaya tababar fudud oo uu saas usii kordhiyaa dhawr maalmood inta uusan ku soo laaban ciyaar buuxda kahor. Ilmahaagu waa inaanu ku soo laaban ciyaaraha tartamada adag ah 2 todobaad ka dib markuu dhaawacmay.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmada Degdega ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryelayaasha.

Resource ID: FS028 **Reviewed:** July 2022

Cudur-daar: Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka waxaana loogu talagalay in loo isticmaalo tilmaame kaliya iyo in lagu taageero, ee aan lagu beddelin, wadhadalka lala yeelanayo dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaas fadlan hubi inaad tixraacayso nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.